Jamhuuriyada Federaalka Soomaaliya
Dowlad Goboleedka Galmudug
Wasaaradda Maaliyadda & Horumarinta Dhaqaalaha

جمهورية الصومالية الفدرالية
حكومـــة اقليـــم جلمـــدج
وزارة المالية وتنمية الإقتصاد

Galmudug State
Ministry of Finance & Economic Development

# Xeerka Maareynta Maaliyadda Maamulka ee 2018

Waxaa uu dhaqangalayaa laga bilaabo

1 Jan 2019

## Xeer-nidaamiye # 3

## Abuurista Habraacyada Miisaaniyad-sanadeedda iyo Waxyaabaha ku jira iyo Dokumentiyada La socda Miisaaniyadda La Soo Jeedinayo

## 1. Awoodda & Hadafka

1.1 Xeer-nidaamiyahan waxaa la soo saarey iyada oo laga ambaqaadayo Madaxa III, Qaybaha 8aad ilaa 27aad ee Xeerka Maareynta Maaliyadda Maamulka/Dadweynaha, 2017. Xeer-nidaamiyahan waa "xeer la diidi karo" sida loogu qeexay Xeerka Maareynta Maaliyadda Maamulka/Dadweynaha waxaana sida ay dhigeyso Qaybta 7aad uu marayaa muddo aan ka badneyn toban (10) maalmood oo uu dib-u-eegis ku sameynayo Baarlamaanka.

1.2 Hadafka laga leeyahay xeer-nidaamiyahan waa in uu sii faahfaahiyo geeddi-socodka miisaaniyad-sanadeedda iyo waxyaabaha ku jira iyo dokumentiyada la socda miisaaniyadda la soo jeedinayo.

1.3 Xeer-nidaamiyahan ma bixinayo faahfaahin ku saabsan sida loo diyaariyo miisaniyadda. Arrintaas waxaa lagu sharxay *Wareegtada Miisaaniyadda* oo sanad kasta uu Wasiirku soo saaro iyada oo Tilmaan-bixin ah.

## 2. Fikradaha iyo mabaa'diida miisaaniyadda

2.1 Sida lagu tilmaamey Cutubka 2aad ee Xeerka Qoondeynta ee sanadlaha ah, Wasaaradaha iyo Hay'adaha Dowladda waa in aaney kharash-gareyn wax ka badan xaddiga lacagta loo qoondeeyey waana in ay maaliyadaha u adeegsadaan keliya ujeeddooyinka loogu cayimey miisaaniyadda la ansaxiyey. Waxaa ka reebban in ay kharash-gareeyaan ama ay horey u sii ballanqaadaan ama ay bixiyaan wax ka badan inta ku jirta miisaaniyadda.

2.2 Miisaaniyadda Dowladdu waa in ay ku fadhidaa natiijooyinka laga filayo mashaariicda iyo waxqabadyada waxaana ay waafaqsanaan doonaan fikradaha iyo mabaa'diida soo socda.

a) Fikradda isku-dheellitirnaanta (yacni, in lacagta la kharash-gareeyo aaney ka badnaan inta la halayo).

b) Kantarooliddai iyo ku-xisaabtanka miisaaniyadda – in la qeexo mas'uuliyadaha iyo yoolalka heerarka kala duwan ee hay'adda marka loo fiiriyo xaddidaadaha maaliyadda ee hawlaha lagu xaqiijinayo.

c) Fikradda taxaddarka iyo mudnaan-siinta – taas oo tilmaameysa in dowladda looga baahan yahay in ay ku shaqeyso tabarteeda iyo in waxqabadyadeedu ay mudnaan u kala siiso si waafaqsan arrimahaa. Wasaaradaha iyo Hay'adaha Dowladda in ay si uu rabitaan ku dheehan yahay oo ku-talogal ah ay u qeexaan waxa ay ku xaqiijin karaan kheyraadka ay hay'aduhu haystaan iyo caqabadaha hor yaaalla.

## 3. Habraacyada Sanadlaha ah ee Miisaaniyadda

3.1. Qiyaasaha dakhliga iyo kharashaadka waa in loo diyaariyaa si waafaqsan *Wareegtada Miisaaniyadda* ee sanadlaha ah ee uu soo saaro Wasiirka Maaliyadda.

*3.2.* Qaab-dhismeedka kala sooca miisaaniyadda ee loo adeegsanayo diyaarinta miisaaniyadda waxaa lagu sharxay ***Xeer-nidaamiye #2 - Xeer-nidaamiye Loogu Talogaley Abuurista Qaab-dhismeed Loo kala-sooco Miisaaniyadda ee Miisaaniyad-diyaarinta & Miisaaniyad-Fulinta.***

3.3. Habraaca diyaarinta Miisaaniyadda waxaa lagu sheegaa *Wareegtada Miisaaniyadda* ee la soo saaro sanad walba waana in lala akhriyaa xeer-nidaamiyeyaashan.

3.4. Si waafaqsan Qaybta 11(2) ee Xeerka Maareynta Maaliyadda Maamulka/Dadweynaha, Wasiirku waa in uu *Wareegtada Miisaaniyadda* u gudbiyaa dhammaan Hay'adaha Kharashgareynta iyo ganacsiyada ay Dowladdu Leedahay ugu dambeyn toddobaadka koowaad ee bisha Luuliyo ee sanadka ka horreeya. Wareegtadu waa in ay sharaxdaa geeddi-socodka miisaaniyadda waana in ay ku jiraan:

(a) Sanad-maaliyadeedka ay muddada miisaaniyad-diyaarinti la hal-maasho,
(b) Taariikhaha Geeddi-socodka Miisaaniyadda, ee lagu sheegey kalandarka miisaaniyad-sanadeedka,
(c) Tilmaamaha/amarrada ku saabsan sida soo-gudbinta miisaaniyadda lagu helayo,
(d) Foomamka loo baahan yahay in loo adeegsado qiyaasaha miisaaniyadda ee loo soo gudbinayo Wasaaradda,
(e) Liiska Hay'adaha Kharash-gareynta ee Dowladda ee looga baahan yahay in ay soo gudbiyaan qiyaasaha miisaaniyaddooda,
(f) Halka ugu badan ee aaney dhaafi karin miisaaniyadda Hay'ad Kasta oo kharash-gareyn, iyo
(g) Macluumaad kasta oo kale oo uu Wasiirku go'aamiyo muddo ka dibba

3.5 Foomamka loo soo saaro Hay'adaha Kharash-gareynta si ay ugu soo ururiyaan qiyaasaha miisaaniyadda waxaa ay noqon karaan fayl kombuyutar (*softcopy)* ama kuwo daabacan (*hard copy*) waana in qaabka (*layout-ka)* iyo wax ku qoranba ay waafaqsanaadaan *Wareegtada Maliyadda* waana in ay ku jiraan:

(a) Qiyaasaha Dakhliga
(b) Qiyaasaha Kharashaadka Soo-nonoqda oo ay ku qoran yihiin wadarta ujuurooyinka iyo mushaaraadka iyo kharashaadka kale ee hawlgalka
(c) Qiyaasaha shaqaalaha. Faahfaahinta shaqaalaha Wasaaradda ee hadda shaqeeya iyo kuwa loo baahan yahay ee la soo jeedinayo oo u habeysan jagada iyo darajada oo ay ka muuqato qiyaasta miisaaniyadda jago kasta
(d) Kharashaadka hantida (raasamaalka), iyo
(e) Kharashaadka Mashaariicda Horumarinta ee La Soo Jeedinayo. Faahfaahinta mashaariicda hantida (raasamaalka) ee Wasaarad kasta u cayiman
(f) Maaliyadda ay deeq-bixiyeyaasha bixiyaan ee ka baxsan Xiisaabta Keliya ee Khasnadda, kaash iyo wax aan kaash ahaynba, iyo
(g) Foomamka kale ee Wasaaraddu ay soo saarto

3.6 Foomamka jaango'an ee loogu baahdo geeddi-socodka miisaaniyadda waa in uu ansaxiyaa Wasiirka Maaliyadda waana in uu ansaxiyaa foomam kasta oo kale oo dheeri ah ama wax-ka-beddel kasta oo kale oo lagu sameeyo foomamka hadda jira ee laga yaabo in muddo ka dibba loo baahdo.

3.7 Wareegtada miisaaniyaddu waa in lagu baahiyaa barta *internet*-ka ee Dowladda muddo 7 maalmood oo la shaqeynayo gudahooda oo ka bilaabma marka ay soo saaraan Hay'adaha Kharash-gareynaya.

## 4. Wareegtada Miisaaniyadda

4.1. Waxaa muhiim ah in diyaarinta miisaaniyad-sanadeeddu ay raacdo geeddi-socod nidaamsan oo ay ka-qaybgalaan dhammaan kuwa ay saameynayso. Marxaladaha ugu waaweyn ee diyaarinta



miisaaniyad-sanadeedda ee sanad-maaliyadeed caadi ah ayaa loogu sharxay wareegtada miisaaniyadda sida hoos ka muuqata (taariikhaha gaarka ah ee ay bixinayso Wareegtada Miisaaniyadda):

| Taariikhda | Dhacdada | Cidda ka mas'uulka ah |
|---|---|---|
| Bartamaha Maajo | Waraaqda Qaabka Guud ee Miisaaniyadda oo loo jeediyo Golaha Wasiirrada si ay u tixgeliyaan | Waaxda Miisaaniyadda, Wasaaradda Maaliyadda |
| Toddobaadka 1aad ee Luuliyo | Wareegtada Miisaaniyadda iyo tilmaamaha/amarrada oo uu soo saaro Wasiirka Maaliyadda | Waaxda Miisaaniyadda, Wasaaradda Maaliyadda |
| Ugu dambeyn dhammaadka Agoosto | Wasaaradaha oo qiyaasaha kharashaadka iyo boroboosallada mashaariicda u soo gudbiya Waaxda Miisaaniyadda ee Wasaaradda Maaliyadda. | Dhammaan Wasaaradaha iyo Hay'adaha Dowladda |
| In la dhammeeyo dhammaadka Sebtembar | Munaaqashooyin ay Wasaaradda Maaliyadda iyo Wasaaradaha kale ka yeeshaan miisaaniyadaha la soo gudbiyey. Mideynta qiyaasaha miisaaniyadda. | Waaxda Miisaaniyadda, Wasaaradda Maaliyadda / Dhammaan Wasaaradaha iyo Hay'adaha Dowladda |
| Ugu dambeyn bartamaha Oktoobar | Miisaaniyadda soo-jeedinta ah oo loo soo bandhigo Golaha Wasiirrada si ay u tixgeliyaan | Wasaaradda Maaliyadda |
| Ugu dambeyn 31ka Oktoobar | Miisaaniyadda soo-jeedinta ah oo loo bandhigo Baarlamaanka si uu u ansaxiyo | Wasaaradda Maaliyadda |
| Soddon (30) maalmood gudahooda ka dib marka la gudbiyo miisaaniyadda la soo jeedinayo | Qorshe-sanadeedyada Dakhliga iyo Kharash-gareynta oo loo gudbiyo Wasiirka Maaliyadda (si ku saleysan miisaaniyadda soo-jeedinta ah ee loo gudbiyey Baarlamaanka) | Dhammaan Wasaaradaha iyo Hay'adaha Dowladda |
| Ugu dambeyn 31ka Disembar | Ansaxinta Baarlamaanka iyo saxiixa Madaxweynaha | Baarlamaanka iyo Madaxweynaha |

## 5. Miisaaniyadda oo Loo Gudbiyo Wasaaradda Maaliyadda

5.1. Marka ay Wasaaradaha iyo Hay'adaha ay ka soo jawaabaan Wareegtada Miisaaniyadda ayna soo gudbiyaan qiyaasahooda, Wasaaradda Maaliyadda waxaa ay dib-u-eegis ku sameyneysaa qiyaasaha ay soo gudbisey Wasaarad walba iyo Hay'ad walba goonideeda, iyo sidoo kale wadarta guud ee dowladda. Wada-hadal joogto ah oo dib loogugu noqonayo kala mudnaansiinta qiyaasaha ayaa dhex

maraya Wasaaradaha iyo Wasaaradda Maaliyadda, taas oo caadi ahaan socota muddo dhowr toddobaad ah, si loogu heshiiyo qiyaasaha kama-dambeysta ah ee miisaaniyadda ee la isu geeyey.

5.2. Miisaaniyadda la isu geeyey ee kama-dambeysta ah ayaa marka hore loo gudbiyaa Wasiirka Maaliyadda, si uu dib-u-eegis ugu sameeyo uuna u ansaxiyo. Waqtigan, ayaa sida ay sharxayso Qaybta 12aad ee Xeerka Maareynta Maaliyadda Maamulka/Dadweynaha, ayaa Wasaaradda Maaliyadda waxaa waajib ku ah in ay qorto dokumentiyada Miisaaniyadda iyo Farriinta Madaxweynaha ee Miisaaniyadda ama haddii uu u wakiisho Wasiirka, sida ay dhigeyso qaybta 5aad ee Xeerka Maareynta Maaliyadda maamulka, khudbadda Wasiirka, oo qaadaneysa kaalintii farriintii Madaxweynaha. Sida ay dhigeyso Qaybta 11(1) ee Xeerka Maareynta Maaliyadda Maamulka/Dadweynaha, qabyo-qoraalka Miisaaniyadda iyo dokumentiyada la socda waa in uu Wasiirka Maaliyaddu u gudbiyaa Baarlamaanka ugu dambeyn laba (2) bilood ka hor inta uusan bilaaban Sanad-Maaliyadeedka (yacni, ka hor 31ka Oktoobar).

## 6. Miisaaniyadda La-ansaxiyey

6.1. Ka dib marka Miisaaniyad-sanadeedda uu ansaxiyo Baarlamaanka, miisaaniyaddu waxaa ay noqoneysaa miisaaniyad qoondeysan. Miisaaniyad qoondeysan waxaa ay la xiriirtaa oggolaanshaha Xeer Baarlamaani ah uu oggolaadey in Wasaaradaha iyo hay'adaha dowladdu ay kharash-geli karaan, ayna kharashkaas ka bixin karaan Maaliyadda Mideysan. Qoondeyntu macnaheedu ma aha in lacag kaash ah si dhab ah meel loo dhigo, laakiin waxaa ay ka dhigan tahay lacagta ugu badan ee sharci ahaan loo ansaxiyey in la kharash-gareyn karo muddo cayiman gudaheeda.

6.2. Marba haddii la ansxiyey miisaaniyadda, Wasiirka Maaliyadda waa in uu Wasaaradaha iyo Madaxda Hay'adaha ogeysiiyaa qoondeymaha la ansaxiyey ee iyaga loogu talogaley. Wasaaradaha waxaa markaa ka dib ay awoodi doonaan in ay kharash ka bixiyaan miisaaniyaddooda marka Qoondeynta Maaliyadaha ay soo saarto Waaxda Khasnadda ee Wasaaradda Maaliyadda. Wasaaradaha iyo hay'adaha waa in aaney kharashgareyn wax ka badan waxa loo qoondeeyey waana in ay maaliyadaha u adeegsadaan keliya ujeeddooyinkii loogu talogaley ee ku cayiman miisaaniyadda la ansaxiyey. Waxaa ka reebban in ay kharashgareeyaan ama ay horey u ballanqaadaan lacag-bixin ama ay bixiyaan lacag ka badan inta ku jirta miisaaniyadda loo qoondeeyey.

6.3. Qoomeymaha miisaaniyadda waxaa ay ku saleysan yihiin Qorshe-sanadeedyada Dakhliga iyo Kharash-gareynta ee Wasaaradaha iyo Hay'adaha Dowladda u soo gudbiyeen Wasiirka Maaliyadda.

## 7. Dokumentiyada iyo Waxyaabaha ku Jira Miisaaniyadda La Soo Jeediyey



7.1. Sida ay dhigeyso Qaybta 12aad ee Xeerka Maareynta Maaliyadda Maamulka/Dadweynaha, miisaaniyad-sanadeedda waxaa loo soo gudbiyaa Baarlamaanka iyada oo ay la socdaan dokumentiyada soo socda ee kaabaya

(a) Waraad ka hadleysa qaabka guud ee miisaaniyadda oo tibaaxaysa:

   (i) faahfaahin ku saabsan muuqaalka guud ee dhaqaalaha & maaliyadda ee Dowlad-goboleedka Galmudug
   (ii) qaabka maaliyadda guud ee miisaaniyadda mideysan oo ku fadhiya qiyaasaha sanad-maaliyadeedka markaa socda iyo labada (2) sano ee xiga isaga oo bixinaya bayaan muujinaya sida ay ahayd xaaladda maaliyadeed ee 2dii sano ee la soo dhaafey.
   (iii) Go'aamada dhanka siyaasadda iyo filashooyinka, iyo
   (iv) Qorsheyaasha sii wanaajinta dakhliga

(b) Qiysaasaha faahfaahsan ee miisaaniyad-sanadeedda ee Wasaarad kasta iyada oo u qaybsan sumad xisaabeedda Miisaaniyadda waana in ay ka mid ahaadaan:
   (i) Miisaaniyadda asalka ah iyo miisaaniyadda lagu noqdey oo muujinaya lacagta dhab ahaan la heley iyo lacagaha la qiyaasayo in la helo dhammaadka sanad maaliyadeedka hadda socda.
   (ii) Lacagihii la heley sanadkii hore

(c) Qoraal sharci ah oo tibaaxaya is-beddel kasta oo lagu sameeyey siyaasadda cashuurta iyo dakhliga kale ee aan cashuurta ahayn waana in ay ka mid ahaadaan:
   (i) Dakhliga dad soo geleya ee u habboon,
   (ii) Taariikhda is-beddelada la sameeyey / is-beddellada lagu talinayo in la sameeyo iyada oo lagu soo lifaaqayo oggolaanshaha Golaha Wasiirrada iyo Baarlamaanka
   (iii) Raadka la qiyaasayo in ay dakhliga ku yeeshaan is-beddellada la soo jeedinayo

(d) Lifaaq qaab kooban ay ugu qoran yihiin dhammaan maalgelimaha deeq-bixiyeyaasha waana in ay ka mid ahaadaan:
   (i) Magaca Deeq-bixiyaha
   (ii) Muddada uu soconayo mashruuca oo tibaaxaysa taariikhda uu bilaabayo iyo taariikhda uu dhammaayo
   (iii) Xaddiga maaliyadsiinta deeqda ah
   (iv) Lacag kaash ama wax aan kaash ahayn ah
   (v) Wasaaradda / Hay'adda ka-faa'iideyneysa maalyadsiinta deeq-bixiyaha
   (vi) Faahfaahinta sida maaliyadaha loo kharash-gareynayo, oo kharashaadka loogu soo bandhigayo qaab kooban iyada oo la adeegsanayo qaab-dhismeedka kala-soocidda miisaaniyadda ee Dowlad-goboleedka Galmudug, iyo
   (vii) Qaababka la tacaamulka bankiyada ee kantaroolka & maareynta maaliyadda deeq-bixiyaha

(e) Fariinta Madaxweynaha ama khudbadda Wasiirka ee miisaaniyadda.

(f) Qorshaha Dakhliga iyo Kharash-gareynta ee Sanadka ("Qorshe-sanadeedka") oo u qoran bil-bil oo ku habeysan sumadda xisaabaadka miisaaniyadda ee ay bixiso Waaxda Khasnadda oo muddo ka dibba wax looga beddeli karo.

**Wasiirka Wasaaradda Maaliyadda Galmudug**

**Mudane: Saciid Siyaad Shirwac**